

Gacaliyayaal, Ardeyda, Shaqaalaha, iyo Qoysaska,

Bishan Oktoobar waxa ay calaamad u noqoneysaa bilowga bishii labaad ee Guddoomiyaha Waxbarashada Portland ee ku-meel-gaarka ah aan ka ahaa. Waxaa sharaf ii ah in la siiyo fursadani aan idiinku shaqeynayo idinka iyo bulshadani waqtigani muhiimka ah ee lagu gudo jiro xaalada kala guurka, iyada oo in ka badan 30 sanadood ahaa xirfadle ku dhex jira waxbarashada dadweynaha.

Waxaan arkay bishii aan shaqada ku jiray warbixintii ugu horeysay ee taya'da macalimiinta, shaqaalaha iyo hoggaamiyaasha kuwaas oo maalin walba ka shaqeynaya sidii ay gargaar waxbarasho oo taya'diisu sarreyso u siiyaan tiro ku dhow 49,000 arday, sababtoo ah waxa ay hayaan agabkii ay ku guuleysan lahaayeen kuna gaari lahaayeen mustaqbalkooda. Sababtoo ah, waxaan ogahay inaan leenahay dhammaan dugsiyada degmada aqoonyahano bulshada ah oo ay ka go'an tahay, waalidiin iyo shaqaale. Waxaan kalsooni ku qabaa in mustaqbalka Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) uu yahay mid cad, cagtana aan saarnay jidkii wanaagsanaa iyadoo aan ku sii jihaysanahay mid ka sii fiican.

Maaha wax badan sanad shaqo ahi, sidaas awgeed afartii todobaad ee ugu dambeeyey waxaan diirada saarayey sidii aan u baran lahaa intii aan karo dugsiyada degmada iyo sidii aan uu raadin lahaa sida ugu wanaagsan ee aan u caawin karo sanadkan inaan aasaaso sees adag kaasi oo ku soo dhaweyn karno hoggaamiye cusub sanad-dugsiyeedka 2017-18.

Waxaa jira saddex qodob oo aan rabo inaan diirada saaro, iyadoo aan ku saleynayo wixii aan ka bartay:

- Hawlgalada Degmada
- Nabadgelyada iyo Caafimaadka Deegaanka
- Kalsoonida Bulshada

Saddexdan qodob waxay yihiin kuwa ugu muhiimsan guud ahaan guusha ardeydeena.

Hawlgalada dugsiyada degmadeenu waa in ay noqdaan kuwa waxa ku ool ah oo baahiyaha iskuuladeena ka jawaaba. Waxaan u baahanahay inaan ku sameyno dib u habeyn iyo isbedel maaliyadeed dhinaca sida ay u kala mudan tahay waxbarashadeenu; sidoo kale iyada oo dib loo dhisayo lana raadinayo maskax cusub oo ku soo biirta Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) waaxyaheeda muhiimka ah..

Waxaa kale na hortaaloo dhammaan masuuliyad aasaasi ah cid kasta oo maalin walba tegta iskuuladeenaa- sida ardeyda iyo shaqaalaha- sidii aan u xaqiijin lahayn in dhismaha ay wax ka dhigayaan iyo midka ay wax ka baranayaan yihiin kuwa nabad ah, caafimaad leh, iyo mid dhisme ahaan leh hawo iyo biyo nadiif ah.

Awooda guul lagu gaarsiinayo ardeydeena waxaa udub-dhaxaadkeedu ku xiran yahay xiriirka adag ee bulshada oo ku dhisan is-aamin. Taasi macnaheedu maaha in dhammaan arrimaha jira mar walba iyo waqti walba la isku wada raacsan yahay, laakiin taasina macnaheedu waxa weeye wada hadal xushmad leh oo aad looga fikiray lagana dooday iyo ka go'naanshaha inay wax waliba daahfurnaadaan, iyada oo wada-jir loo maareynayo dhibaataada. Hawlo faro badan oo arrimahan ah ayaa inoo yaala sidii aan wax uga qaban lahayn, laakiin aniga waxaa iga go'an sidii aan arrimahan iskaashi wada jir ah aan kaga shaqeyn lahaa.

Waxaan aad ugu faraxsanahay sanadka soo socda. Iyada oo ay jiraan caqabado fara badan, haddana sidoo kale waxaa jira furado fara badan. Waxaan aaminsahay haddii aynu si wada jir ah u wada shaqeyno in aan soo jiidan karno Guddoomiyaha waxbarasho ee aan taya'diisa raadineyno inuu hoggaamiyo dugsiyada degmadeena kaasi oo caawiya ardeydeena sidii ay dhammaantood u noqon lahayeen kuwa gaara guusha ay higsanayaan.

Waxaan rajeynayaa inaan idinla shaqeeyo, iyadoo mar walba fikiradihiina iyo soo-jeedintiinuba ay u furan tahay irideyda. Waxa aynu nahay kuwo isku duuban- ardeydeenu inaga ayay inagu tiirsan yihiin.

Daacadnimo,
Bob McKean